**XEERKA L. 2357 EE 9 DISEMBER 1952 EE MADAXYENAHA JAMHUURIYADDA**

**Xilka Maamulaha guud iyo Hey'aadaha as aasaasiga ee Maamulka walaayahda talyaaniga ee Soomaaliya (A.F.I.S.)**

**MADAXWEYNHA JAMHUURIYADA**

KADIB markii la arkay faqradda 1aad ee qodobka 77 iyo faqradda 5aad ee qodobka 87 ee Dastuurka.

KADIB makii laga baaran degey sharciga lamb. 1301 ee 4 Nofeembar 1951;

IYADOO la tixgeliyey metelaadada lagu siiyey qodobka 3 ee isla sharcigaasi;

IYADOO la tixgeliyey aragtida Maxkamadda Xisaabaha ee Qeybtiisa isku darsan;

IYADOO la arkay dekreetada lamb. 247 ee 22 Diseember 1955 oo ansixiey Xeerka Shaqalaha madaniga ah ee dowladda Somaliyeed;

IYADOO la tixgeliyey aragtida Golaha Wasiiradaha;

IYADOO la tixgelieye soo jeedinta Guddomiyaha Golaha Wasiradaha, Wasiirka Arrimaha Dibedda iyagoo la tashtay Wasiradda Cadaaladda iyo midka Difaaca.

**WAXAA LA AMRAY:**

**Qod. 1**

Dowladda Jamhuuriyadda Talyaaniga, oo ah Hey'adda loo xilsaaray Maamulka Walaayadda Dhulka Somaliya iyadoo la tixraacayo Heshiiska Walaayada oo lagu soo gunaanaday magaalada Ginevra 27 Janaanyo 1950, laguna fuliyey sharciga lamb. 1301 ee 4 Nofeembar 1951, wuxuu wakiil uga noqon doonaa Maamulaha Guud oo lagu magacaabi doono iyadoo la tixraacaya qod. 4aad ee isla sharcigaasi.

**Qod. 2**

Dowladda Talyaaniga ayaa mas'uul ka noqon doona xiririrka arrimaha calaamka ah ee la xiriira Somaliya. Wakiiladaha dibloomasiyinta iyo qunsuliyadda dibedda ee u jooga dalka Talyaaniga ayaa mas'uul ka ah badbaadinta muwaadininta Somaliya.

Fulinta qunsuliyadaha dibedda ee Somalia ayaa loogu ogolaaday dekreetada Jamhuuriyadda Talyaaniga.

**Qod. 3**

Awoodaha Maamulaha Guud waxay ka soo arooreen Heshiiska Wakiilnimada iyo shurucda fulintooda.

Maamuluhu wuxuu daneyn doonaa wax kasto oo la xirira ttixgelin doona aragtida Golaha La Tashiga ee Qaramadaha Midoobay u qaabilsan Somaliya.

**Qod. 4**

Maamulaha Guud ayaa iska leh awooda sharci dejinta sida ku cad qodobada 4 iyo 5 ee Caddeynta Mabaa'diida Dastuuriga ah ee ku lifaaqan Heshiiska Walaayahaiyadoo saldhig loogaga dhigcayq Deegaan ee kasta wuxuu leeyahay aqonsi qeynuuni ah.

Xeerarka waxaa soo saari doono Maamulaha Guud qab ah amar-sharci Isla habkaasi ayuu Maamulaha Guud uu ku fulin doona shurucda Talyaaninga dalka Somaliya sida ku cad qodobka 7 ee Heshiiska Walaayada.

Haddii usan qodobka soo socda si kale u dhigin, amar-sharci kasta ee la xirira waajjibaad caalami ah, waxaa la soo sari karaa oo keliya haddii uu Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Talyaanigu uu aqbalo.

Haddii Wasaaradda Arrimaha Dibedda ka soo jawaabin amar-sharci muddo 30 beri in ka badan, Maamulaha Guud wuu soo saari kara isla amar-sharcigaasi

Haddii ay jirto arrimo deg deg ah, Maamulaha Guud wuxuu soo sari kara amar-sharci iyadoo aan waqtigii dhamaanin.

**Qod. 5**

Maamulaha Guud wuxuu markii loo eego marxaladaha degdeg ah soo saari kara amarro-sharci ee khuseeya qod. 5aad ee Caddeynta ee Mabaa'diida Dastuuriga ah eek u lifaaqan Heshiiska Walaayada, kaas oo si deg deg ah wargelin doono Wasiirka Arrimaha Dibedda.

**Qod. 6**

Maamulaha Guud wuxuu sidoo kale soo saari kara dekreetoyin iyo xeer nidaamiye oo loogu tala gala in sharciga Talyaaniga laga hirgeliyo dhulka Somaliya.

**Qod. 7**

Amarrada sharci iyo dekreetoyinka ee ku qoran qodobada sare ku xusan waxay hirgeli doonaan 15 kadib markii lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ee Maamulka Walaayada Talyaaniga ee Somaliya, haddii uusan sharci kale si kale u qoreynin.

**Qod. 8**

Shurucda iyo xeerarka laga soo saray dalka Talyaaniga ee loo tala galay in laga hirgeliyo Maamulka Walaayadda waxaa lagu soo qori doona Faafinta Rasmiga ee Maamulka Walaayada Talyaaniga ee Somaliya. Muddada hirgelintooda waxay ka bilaaban doonta maalinta lagu soo qoro Faafintasi.

**Qod. 9**

Maamulaha Guud waa madaxa Maamulka Walaayada.
Waxaa la shaqeyn doona Xoghaye Guud oo lagu magaacabi doono dekreeto ka soo baxda xafiiska Madaxweynaha Talyaaniga isagoo la tashtay Wasiirka Arrimaha Dibedda.

Xoghayaha Guud wuxuu hos teegi doona Maamulaha Guud wuxuuna meteli doona isaga haddii uu ka maqan yahay shaqada.

**Qod. 10**

Maamulaha Guud waa madaxa ciidanka qalabka sida ee Dhulka Somaliya, isaga ayaa ku maareyn doono maamulka ciidanka isagoo soo saari doono dekreetoyin oo uu kala tashtay Wasiirka Arrimaha Dibedda iyo kan Difaaca.

**Qod. 11**

Maamulaha Guud wuxuu awood u leeyahay in uu fidiyo cafis guud ama uu wax ka bedelo xukunka maxkamadda.

**Qod. 12**

Maamulaha Guud ayaa ku dhisi doono dekreetod Guddiga Maamulidda kaas oo uu guddoomin doono kaas oo ka koobanaan doono Xoghaye Guud, 6 ila 8 xubno oo isagu ka soo xulan doono madaxda Qeybaha xafiisyada iyo adeegyada Dhexe ee Maamulka Walaayada.

**Qod. 13**

Guddiga Maamulka waa hey'ad la tashi ee Maamulaha.

Guddigu wuxuu ka bixin doona talo arrimaha hoos ku qoran:

— Qorshada horumarinta siyaasadeed, dhaqaale iyo bulshadeed ee Somaliya;
— Xeerarka la soo saraayo;
— Misaaniyada hor dhaca iyo kan la isticmaalay;
— Iyo marxalad kasto oo loo baahan yahay in talo laga soo jeediyo sida sharciga qabo.

Haddii Maamulaha Guud iyo Xoghaya Guud ay imaan Karin fadhiyada la qondeeyey, wuxuu Guddiga yeelan doona awooda in ay go'an ka gaaran arrimaha degdegta ah.

**Qod. 14**

Xeer-nidaamiyaha Garsoorka ee Somaliaya sida ku xusan qod. 7 ee Caddeynta oo ku lifaaqan Heshiiska Walaayada waxaa lagu dhisi doona amar-sharciga ka soo baxa Maamulaha Guud oo lala jangoyey mabaadiida ku qoran isla qodobkaasi.

Xeer nidaamyuhu waa in leeyahay:

1) Dhismaha Maxkamad oo leh awood garsood oo dhowraaya in tasfiirka sharciga uu noqdo mid middeysan, markii loo eego darajyooinka cadaalada ee kala sareeya, ama xeendabka ay gaarsiisan yihiin iyo is khilaaftka awooda iyo in xal loo heli karo wixii caqabad ah ee la xiiirara sharciga;

2) Awooda Maxkamadaasi in ay qaadi karto cabashooyinka iyo dacwooyinka lid ku ah go'aanadda , ku xad gudubka xeerarka io shuruucda ee lid ku ah Maamulaha Guud ee Walaayada;

3) Awooda Maxkamadaasi ka gun gaarka arrimaha la xiriiro xisaab celinta, mas'uuliyadda, gunnoyinka howlgabkaiyo xukumada la mid ah;

4) Dhismaha hey'addaha ballan qaadi karo in uu garsooruhu yeesho xorriyad go'aan iyo in la ilaaliyo howsha garsoorka guud ahaan.

**Qod. 15**

Guddomiyaha Maxkamadda waxaa laga soo magacaabi dekreeto Madaxweynaha Jamhuuriyada isagoo la tashtay Wasiirka Arrimaha Dibedda iyo midka Cadaaladda. Waxaa laga soo xuli doonaa Garsoorayasha Talyaaniga ee Maxkamadda Cassazione ama Maxkamadda Rafcaanka.

Dekreetada, oo wato tilmaanta Dowladda, waxaa lagu keydin doonaa Keydka rasmiga ee shuruucda iyo dekreetoyinka Jamhuuriyadda Talyaaniga. Waxaa la farayaa qofkasta in la dhowro lana faro dadka in ay dhowraan.

EINAUDI
**De Gasperi – Zolli – Pacciardi**

Kormeeraha tilmaanta: **Zolli**

Waxaa lagu qoray Maxkamadda Xisabaha, 20 Diseembar 1952
Qoraalka Dowladda, keydka no 61, bogga lamb. 34 – **Palla**